

Waqti xaddidan (time out)

ARIMO LA XIRIIRA WAQTI XADDIDAN (time out)

Dhamaad waxaa loola jeedaa marka aad ilmaha ka wadayso arin faraha ka sii baxaysa oo uu ilmuhu anshax-xumo sameynayo. Waqti xaddidan fursad ayey siineysaa ilmaha iyo waalidka inay qaboobaan.

- Isku day inaad waqti xaddidan mar kasta isticmaalin
- Waqti xaddidan waa inaan loo isticmaalin ilmaha 3 sano ka yar
- Waalidku waa inay degan yihiin, balse ku adkeystaan, markii ay ilmaha dhahaan waqti xaddidan



Maxay tahay waqti xaddidan?

Waqti xaddidan waxaa loola jeedaa marka aad ilmaha ka wadayso arin faraha ka sii baxaysa oo uu ilmuhu anshax-xumo sameynayo. Waqti xaddidan fursad ayuu siinayaa ilmaha iyo waalidka inay qaboobaan.

Sida loo isticmaalo waqti xaddidan:

- U hel meel fiican oo ilmuhu tagaan markii ay wax haleeyaan. Waa inay ka fogaataa meeshii wax ka dhaceen ama meeshii akhlaaq xumada ku sameeyey
- U sheeg ilmahaaga inuu bareeg u baahan yahay. U sheeg inaad uga baahan tahay inuu

joogo meesha loo gartay ilaa uu ka dego ama diyaar u yahay inuu si wanaagsan u dhaqmo

- Haddii ilmuhu isku dayo inuu meeshii ka tago intaan xiligii dhamaan, si tartiib ah ugu soo celi. U sheeg inuu goobtisii cayaarta ku soo noqon karo markii uu dego ama ama diyaar u yahay inuu si wanaagsan u dhaqmo
- Markii ilmuhu dego, kala hadal sababtii uu ugu baahnaa in meesha laga wado iyo waxa aad ka rajeynayso hadda ka dib. Haddii ilmuhu ilmo kale waxyeelay, waa inuu raali galin ka bixiyaa. Haddii uu wax tuuray, waa inuu soo qabtaa. Tani waxay ilmahaaga fursad u siineysaa inuu saxo anshax xumadiisa
- Mar kasta amaan ilmahaaga markii uu caro baaba’o kuna soo laabto howshiisii dhibaato la’aan

Fikrado kale:

- Waalidka qaarkood waxay isticmaalaan saacad. Sii hal daqiiqo oo waqti xaddidan ah inta sano ee ilmahaagu jiro. Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu 4 sano jiro, 4 daqiiqo ayuu joogayaa meesha ganaaxa
- Markii ilmuhu sii koraan, isku day inay meesha ganaaxa ka tagaan markii ay diyaar yihiin. Taasi waxay ilmaha ka caawineysaa inay ogaadaan markii ay caro baaba’een
- Waa iska caadi in ilmuhu buug akhristo ama xujooyin isku gee-geeyo marka uu ku jiro meesha ganaaxa. Sii boonbalayaal ama buugaag uu ku caro baaba’o
- Ku dhiiri geli ilmaha inuu iskiis u qaato waqti xaddidan markii uu u baahan yahay inuu dego ama uu u baahan yahay bareeg

TUSAALEYNTA WAALIDKA

Isticmaalka waqti xaddidan.

Waqti xaddidan waxaa loo isticmaalaa in laga hortago anshax la'aan. U sheeg ilmahaaga inuu waqti xaddidan inta uu ka caro baaba'yo loogana hortago arinta oo faraha ka baxda. Waqti xaddidan waxaa kaloo loo isticmaali karaa marka ilmuhu muujiyo anshax la'aan. Fursad lagu dego ayey cid walba siineysaa. Markii waqtigii dhamaado, waxaad xalin kartaa dhibka jira.

